

Hel Lacag kaaga soo noqota kiridhidka canshuurta ee Minnesota!

Kiridhidka canshuurta ee Minnesota waxa uu kaa caawin karaa bixinta lacagta canshuurta ah ee lagugu yeesho ama waxa uu kuu soo celin karaa lacag badan.

Haddii aad xaq u leedahay, sheego kiridhidka canshuurta kolka aad xareysato canshuur celintaadda. Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato in ka badan hal mid!

- **Kiridhidka canshuurta ee ilmaha**
- **Kiridhidka Qoysaska Shaqeeya**
- **Kiridhidka Waxbarshada K-12**
- **Kiridhidka Kiraystaha Guriga**
- **Kiridhidka Lacag soo celinta Guriga (Mulkiilayaasha guryaha)**



Mari (Scan) halkan si wax badan aad u ogaato.



Minneapolis

111 N. Fifth St., Ste 100
Minneapolis, MN 55403
800.292.4150
info@mylegalaid.org

St. Cloud

110 Sixth Ave. S., Ste. 200
St. Cloud, MN 56301
218.722.5625

Willmar

415 SW Seventh St.
PO Box 1866
Willmar, MN 56201
218.945.3154



Rugta Canshuur-bixiyaha Danyarta ah

Dhib ma kaa haystaa canshuurta? Ka hel caawimaad dhanka sharciga ah oo bilaash ah.

Barnaamij gobolka oo dhan ah oo ay leedahay hay'adda Mid-Minnesota Legal Aid

Qasdigayaga

Rugtayadda Canshuur-bixiyaha Danyarta ah waxa ay ka caawisaa canshuur-bixiyeyaasha Minnesota wixii khilaaf ah ee u dhaxeeya iyaga iyo Laanta Adeega Canshuuraha (Internal Revenue Service, IRS) ama Waaxda Canshuuraha ee MN (Department of Revenue, MNDOR).

Waxa aan dadka ka caawinaa:

- Yareynta ama suulinta canshuurta la bixinayo
- Helid lacag canshuur oo soo noqota
- Ka joojinta hay'adaha IRS ama MNDOR inay qaataan dakhligaaga ama gurigaagga
- Helida qorshe dib u bixin lacagta ah
- Wakiilnimo Maxkamadda Canshuurta ee Gobolka ama tan Dowladda Dhexe ah
- Wakiilnimo Maxkamadda Canshuurta ee Gobolka ama tan Dowladda Dhexe ah
- Wakiilnimo Xisaabi xilma lehda ah
- Suubinta dhibaatooyinka xadida magaca qof ah
- Si khalad ah u tilmaamka shaqada shaqaalahu qabto

Waxa aanu bixinaa:

- Wacyi-gelin bulsho iyo tababaro
- Taakuleyn ah xaquuqda canshuur-bixiyeyaasha danyarta ah iyo kuwa dadka aan u Dhalan Afka -Ingiriiska (ESL)
- Gargaaar farsamo oo ku saabsan arrimaha canshuurta dowladda dhexe iyo kuwa gobolka oo ay bixiyaan qareeno, taakuleeyaal iyo xirfadlayaal.
- Akhbaar ku saabsan sharciga, xeerarka, foomamka iyo habraacyadda dhamaan canshuur-bixiyaasha heerarka kale duwan ee dakhliga ah leh

Ma u baahan tahay caawimaad ku saabsan xareynta canshuurahaaga?

Hay'adda LITC ma xareyso canshuurta-celinta, hase yeeshee, wixii caawimaad canshuur xareyn ah waxa aad kala xiriiri kartaa **Tabarucayaasha Gargaarta Canshuurta Dakhliga** (Volunteer Income Tax Assistance, VITA) ama ururka kala **Talinta canshuurta waayeelka** (TCE). Wac 800.906.9887 ama booqo barta irs.gov/vita si aad hesho akhbaar dheeraad ah.

Maalgelintayadda

- Hay'adda LITC waxa ay ka heshaa maalgelin hay'adda IRS laakiin xulafo lama nihin IRS.
- Hay'adda IRS ma ayido hawlaha hay'adda LITC.
- Adeegsiga hay'adayada LITC ma saameeyso xaquuqda aad ku leedahay hay'ada IRS.
- Hay'adda LITC adeegeeda canshuurta ee gobolka Minnesota waxaa maalgeliya deeq uu bixiyo gobolka Minnesota.

*Kiis walbaa waa goonidi.
Marna ma bixino wax hubaal natiijo ah.*



Khadka Is-qorida:

612.334.5970 (Beledka)
800.292.4150 (Miyiga, Minnesota)

Isniin – Khamiis

8:30 a.m. - 4:30 p.m.

Jimce

8:30 a.m. - Duhur

Waxaa dhici karta inaan ku waydiino su'aalo ku saabsan dakhligaaga iyo xaaladaadda. Wax walba oo aan nala wadaagto waa qarsoodi.



Booqo barta Visit LawHelpMN.org si aad uga hesho khayraadyo dheeraad ah oo ku saabsan sharciga canshuurta